



# Tusaaloyin ah Halka Waqtiga Xaadirka ah Horumarka Tacliinta iyo Hab Shaqeynta Marayaan

(Present Levels of Academic Achievement and functional Performance (PLAAPF) Examples - Somali Version)

Marka la qorayo Qorshaha Waxbarashada gaar-ahaneed, waxa jirta kheyb ka mid ah ee lagu qoro Akhbaaraha ku saabsan Tusaaloyin ah Halka Waqtiga Xaadirka ah Horumarka Tacliintu ee ardeyga taagan tahay, iyo Hab Shaqeynta. Akhbaaraha wa in loo qoraa si kooban, fasiix ah, oo si xaqiiqi ah u tilmaameysa xirfadaha ardeydu marka awood u leedahay, si yoolal la cabiri kara loo sameeyo.

## Tusaale ahaan:

Tusaalo aan fasiix aheyn	Tusaalo fasiix ah
Wa qof bulshay ah oo jecel xiisaha	Si munaasab ah ayey ula mucaamiltaman ardeyda kale ee asagood ah
Darajada xisaabta waxu ka helay 50	Waxuu tirin kara il'aa 25
Si wanaagsan uma hadasho	Waxey ku hadasha hal ama labo jumladood
Wey garaneysa shaqooyinka magacyadooda	Waxey tilmaami karta shan shaqo, iyo howlaha la xiriira
Wa ku adagtahay in uu akhriyo casharka heerka fasalka sadexaad	Waxu akhrin kara casharka fasalka sadexaad, 70 kelmadood daqiiqadii
Wa ku adagtahay in uu raaco qeynuunka fasalka	Waxu raaca qeynuunka fasalka marka loo baaqo
Aklaaq xumo daraadeed, waqti badan bu ciqaab dugsiga u gafa	Marka wax loo tilmaamo wu xanaaqa oo faslka ayuu qalalaaso ka kiciya
Barashada lukhadda aya ku adag, dabadeed madada luqadda dhib buu kala kulmaya	Dib-udhaca luqadda, aya saameyn ku yeelaneysa in uu horumar ka gaaro halki laga rabay, qaas ahaan kelmadsaha micna kala duwan leh
Wa dhif inta uu howsha mamaystiro	Waxuu dhameystira 25% casharka guriga, iyo 10% casharadda kale

## Tusalooyin ka mid ah Halka Waqtiga Xaadirka ah Horumarka Tacliinta iyo Hab Shaqeynta Marayaan:

- Jason waxuu leeyahay dib-udhac xagga akhriska. Wa fasalka 7aad, lakiin akhriska waxu maraya fasalka 3aad. Fahamka wuu fahmaya hadii loo akhriyo macluumaadka fasalka 7aad. Jason waxu u baahan yahay xirfadaha akhriska.
- Lisa waxey leedahay xaaladda loo yaqaan ADHD ama Dhug la'aan sal fudeyd. Xirfadeeda is-maamuleed ma aha mid horumar leh. 75% waxey lumisa hawshi iyo waraaqihii casharadda fasalka, sida daradeed waxey fasalka timadaa iyadon wadan waxyaabihi muhiimka aha ee looga bahna. Dhaqankan daradiis, ma qaban karto howshi fasalka. Lisa waxey u baahan tahay in la baro xirfado ah sidey isu maamuli laheyd.

- Angela wa 10 jir lakiin akhriska waxey la mid tahay sida ilmo dugsiga xanaannada ah, xisaabtana sida ardey fasalka kowaad ah. Inkasto ay faaiido ugu jirto in ay la fadhiso bulshada faceed ah fasalka, lakiin casharada xisaabta akhriska saynska IWM waxey ubaahan tahay in loo hab-dooriyo. Angela waxey u baahan tahay in ay kor u qaado xirfadaheeda waxbarasho.
- Connor wa ilmo leh xaaladda Autisamkja. Xirfadiisa waxbarasho wey ka sareysa heerka sasalkiisa, lakin xirfadihiisa bulsha la dhaqanka iyo xiriirka 2 fasal ayuu ka gaabiya ardeyda la heerka ah. Connor waxuu u baahan yahay in la baro xirfadaha bulsha la dhaqanka iyo xiriirka.

Qoraaladaan waxey kooxda waxbarashada gaar-ahaneed ka caawineysa in ay ogadan halka ardeydu xirfad ahaan marayan, iyo sida dib u-dhacu saameyn ugu yeelanayo waxbarashada, iyo ka kheyb qaadashada manaahijta. Hadii aad akhbaaro siyaada ah u baahan tahay in aan ka ogaato qorsheynta Halka Waqtiga Xaadirka ah Horumarka Tacliintu iyo Hab Shaqeynta Marayaan, waxaad akhrisata qoraalka hey'adda PACER PHP-c186, Halka laga bilaabo: Fahamka Halka Waqtiga Xaadirka ah Horumarka Tacliinta iyo Hab Shaqeynta Marayaan.